

Tababarka Daryeelka Ku Saleysan Xiriirka

Xaashida shaqada ee ka qaybqaataha
daryeelka aasaasiga ah



CHILD CARE

State Capacity Building Center

Xaashida shaqada ee ka qaybqaataha daryeelka aasaasiga ah

Tilmaamaha: U isticmaal xaashidaan si aad u qorto sida macluumaadkaan ula xiriirayo shaqadaada la xiriirta dhallaanka, carruurta yaryar, iyo qoysaskooda, iyo si aad uga qaybqaadato hawlaha kalfadhigan. Haddii aad u baahato meel dheeraad ah oo aad wax ku qorto, isticmaal dhabarka dambe ee boggan.

Qoraallada Qodobbada Muhiimka ah ee Tababarka



Daryeel Bixinta Aasaasiga ah: Hawlaha Tababarka

Bogga 5. Dib u milicsiga Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah

- ◆ Maxaa maskaxda ku soo dhacaya marka aad ka fikirto daryeelka aasaasiga ah?

Bogga 7. Barashada Adiga

- ◆ Maxaad xaqiiqdii jeceshahay inaad sameyso?

- ◆ Waa maxay cuntada aad aadka u jeceshahay?

- ◆ Maxaad jeclaan lahayd inaad barato?

- ◆ Maxaadan jeclayn inaad sameyso?



Bogga 8. Sababta Daryeelka Aasaasiga ah

- ◆ Waa maxay sababta daryeelka aasaasiga ah ay muhiim ugu tahay daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah?

- ◆ Sidee buu daryeelka aasaasiga ah kor ugu qaadaa natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha?

Bogga 10. Tusaalaha Muuqaalka ee Daryeelka Koowaad

- ◆ Sidee bay xannaanada aasaasiga ah u taageertaa ilmahaan yar iyo qoyskeeda?

Bogga 13. Waa maxay Astaamaha Qaar ka mid ah isdhexgalka Daryeel bixiyaha iyo ilmaha ee Wanaagsan?

Bixi tusaalayaalka isdhexgalka daryeel bixiyaha iyo ilmaha.

- ◆ Isdhexgalka **Wax ku oolka ah:**

- ◆ Isdhexgalka **Cilaaqaadka leh:**



Bogga 15. Nidaamka Wax ku oolka ah

- ◆ Sidee habkaan adiga kuugu habboon yahay?

- ◆ Wadaag tusaalaha habka ka jawaab celinta khibradaada:

Bogga 19. Dib u milicsiga

- ◆ Sidee buu u eg yahay daryeelka aasaasiga ah ee barnaamijka daryeelka ilmahaaga ama guriga daryeelka carruurta qoyska?

Bogga 24. U dabbaaldeg Tallaabo kasta oo Ilmo ah oo ku wajahan Daryeelka Koowaad ... Sababtoo ah muhiim ayay u tahay Ilmo kasta!

- ◆ Qor fikradaha tallaabooyinka yaryar ee lagu hirgelin karo daryeelka bixiyaha aasaasiga ah ee adiga kugu habboon.



Bogga 25. Fikradaha Muhiimka ah

- ◆ Maxaa si gaar ah kuu soo jiitay?
- ◆ Maxaad dooneysa inaad xasuusataa?
- ◆ Sidee ayay tani ula xiriirtaa shaqadaada?

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES



Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah

U isticmaal kheyraadkan si uu kaaga caawiyo caddeynta muhiimadda daryeelka aasaasiga ah. Waxa uu gacan ka geysanayaa dhiirrigelinta hab-dhaqannada muhiimka ah ee barnaamijyada si loo hubiyo tayada daryeelka qoysaska ee carruurta lagu daryeelo guryaha iyo xarumaha, kuwaas oo u adeegaya dhallaanka iyo carruurta yaryar.

Mabda'a

Daryeelka-tayada sare leh-ee ku saleysan xiriirka ayaa door muhiim ah ka ciyaara Waynaanta Maskaxda ee carruurta, xakamaynta shucuurta, iyo barashada (Center on the Developing Child, 2012). Barnaamijka Daryeelka Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar (Program for Infant/Toddler Care) wuxuu ku talinayaa lix hab-dhaqan oo muhiim ah oo barnaamijyada ah, kuwaas oo u ah qaab-dhismeedka daryeelka ku saleysan xiriirka. Mid ka mid ah dhaqamadaan ayaa ah **daryeelka koowaad** - dhaqanka kaas oo daryeelka ilmo kasta ama socod baradka lagu meeleeeyo daryeela gaar ah oo ka masuulka ah daryeelka ubadkaas ee jooga goobta daryeelka iyo la xiriirka qoyska ilmaha (Lally & Mangione, nd). Isdhexgal joogtada ah, jawaab celinta leh, iyo isdhexgal macno leh oo lala yeesho daryeelaha aasaasiga ah waxay dhistaa isku xirnaanta ilmaha iyo qof weyn oo la yaqaan (Raikes & Edwards, 2009). Bixinta daryeelka aasaasiga ah waxay sidoo kale xoojisaa xiriirka qoysaska, oo, iyaduna, taageerta horumarinta kalsoonida iyo amniga u dhexeeya dhallaanka ama ilmaha socod baradka ah iyo daryeelaha aasaasiga ah (Lally et al., 2010).

Mas'uuliyadaha daryeel bixiyaha aasaasiga ah waxaa ka mid ah

- ◆ kobcinta xiriirka ilmaha iyo qoyskiisa ama qoyskeeda;
- ◆ la socoshada, diiwaan gelinta, iyo odorooska iyo qorsheynta habka koritaanka iyo waxbarashada ilmo kasta;
- ◆ taageerida ilmaha iyada oo loo marayo kala-guurka;
- ◆ fulinta inta badan nidaamka daryeelka gaarka ah ee ilmaha; iyo
- ◆ bixinta taageerada shucuurta.

Daryeel bixiyaha koowaad micnaheedu ma ahan daryeel aan loo dhamayn. Si kastaba ha ahaatee, waxay la macno tahay, in hogaamiyaasha barnaamijka, daryeel bixiyaasha, iyo qoysasku ay ogaadaan cidda leh mas'uuliyadda aasaasiga ah ee ilmo kasta. Daryeelka koowaad wuxuu inta badan si dabiici ah uga dhacaa guryaha daryeelka ilmaha qoyska (Lally & Mangione, n.d.).

Waa maxay sababta ay daryeelka koowaad muhiim ugu yahay dhallaanka iyo ilmaha Socod-baradka ah?

- ◆ Xidhiidhaha daryeelka koowaad waxay siinayaan aasaas adag isdhexgalka jawaab-celinta iyo xidhiidhka ka dhexeeya dhallaanka ama ilmaha socod-baradka ah iyo daryeel bixiyihiisa (Ruprecht et al., 2016).
- ◆ Daryeel bixiyaasha koowaad waxay siisaa fursado daryeel bixiyayaasha si ay u sii qoto dheereeyaan aqoontooda korriinka ilmaha, kartida, iyo danaha, oo u ogolaanaysa qiimaynta korriinka ee saxda ah iyo hirgelinta manhaj shaqsiyeed (Theilheimer, 2006).

- ◆ Daryeelka koowaad wuxuu bixiyaa fursad iskaashi ka dhexeeya qoysaska, daryeel bixiyaasha aasaasiga ah, iyo takhasusleyaasha (tusaale, caafimaadka dhimirka, caafimaadka, daaweeyayaasha shaqada) oo taageera daryeelka gaarka ah ee dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (McMullen et al., 2016).

Sidee Buu Daryeelka Aasaasiga ah kor ugu qaadaa Natiijooyinka Wanaagsan ee ilmaha?

- ◆ Dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxay kobciyaan kalsooni marka daryeel bixiyaasha koowaad ay ka jawaabaan dabeecadahooda gaarka ah, baahidooda, iyo danahooda (Cople & Bredekamp, 2009).
- ◆ Daryeelka aasaasiga ahi wuxuu taageeraa aqoonsiga dhallaanka iyo socod-baradka iyo xidhiidhka dhaqameed ee qoysaskooda (Lally, 1995; Virmani & Mangione, 2013).
- ◆ Daryeel bixiyaasha koowaad ee muhiimka ah waxay meesha ka saaran walaaca waxayna bixiyaan caawimaada ilmaha yar ama socod baradka nidaami (Sayniska Qaran ee Golaha Carruurta Kobcaya (National Scientific Council on the Developing Child), 2007).
- ◆ Carruurta yaryar ee aan haysan daryeel bixiye koowaad oo taa beddelkeeda la kulma bixiyaasha daryeelka carruurta oo badan (ama goobo daryeel caruur oo badan maalintii) waxay u badan tahay inay yeeshaan dabeecad adag. (Clasien de Schipper et al., 2004; Morrissey, 2009).

Qorshaynta Hirgelinta Daryeelka Koowaad ee Goobaha Daryeelka Carruurta ee Kala Duwan

Yoolka: Barnaamijyada-dhallaanka iyo ilmaha socod-baradka ah ee tayada sare leh waxay hirgeliyaan daryeelka aasaasiga ah ee ilmo kasta iyo ilmaha socod baradka ah.

- ◆ Hirgelinta hagitaan qoraal ah oo taageera daryeelka aasaasiga ah dhammaan barnaamijka. Tani waxaa ka mid ah abuurista buug-gacmeedyada shaqaalaha iyo qoyska oo wadaaga muhiimada, iyo sidoo kale ku dhaqanka, taageerida xeeladaha daryeelka aasaasiga ah ee dhallaanka iyo ilmaha socod-baradka ah iyo qoysaskooda.
- ◆ Samee sharraxaado cad oo shaqo oo loogu talagalay daryeel-bixiyayaasha dhallaanka iyo carruurta yaryar kuwaas oo ku jira filashooyin la xiriira hababka daryeel-bixinta koowaad. Tani waxaa ka mid ah in lala xiriiriyo qoysaska, barashada dhaqamada guriga qoyska iyo dabeecada daryeel siinta, iyo in khibradaha daryeelka guriga laga dhigo mid maalinle ah.
- ◆ Ka qaybgal, samee, ama u doode horumarinta xirfadeed ee dhiirrigelisa daryeelka aasaasiga ah ee koowaad.
 - Xoojinta horumarinta xirfada ee daryeel bixiyaasha iyo maamulayaasha fikradaha iyo hirgelinta daryeelka aasaasiga ah. Tani waa inay ka bilaabataa tababarka marka shaqaale cusub la qorayo oo ay sii socoto ilaa sanadaha shaqada.
- ◆ Adeegso hab dib-u-eegis oo ula kac ah si joogto ah loo xoojiyo daryeelka aasaasiga ah ee koowaad ee guud ahaan xarunta ama barnaamijka daryeelka carruurta ee qoyska.

Tixraacyada

- Center on the Developing Child. (2012). *Hawl Fulinta (Executive function): Xirfadaha nolasha iyo waxbarashada* [InBrief summary]. <http://developingchild.harvard.edu/resources/inbrief-executive-function/>
- Clasien de Schipper, J., Van Ijzendoorn, M. H., & Tavecchio, L. W. C. (2004). Xasiloonida xanaano maalmeedka xarunta (Stability in center day care): Xiriirada ka dhexeeya faya-qabka ilmaha iyo dabecada dhibaataada ah ee ka jirta daryeelka maalintii. *Kobaca Bulshada*, 13(4), 531–550.
- Copple, C., & Bredekamp, S. (2009). *Dhaqanada ku habboon korriinka ee barnaamijyada dhallaanka (Developmentally appropriate practices in early childhood programs)* (daabacaada 3aad).
Urukka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (National Association for the Education of Young Children).
- Lally, J. R. (1995). Saameynta siyaasadaha iyo dhaqamada daryeelka ilmaha ee sameynta aqoonsiga dhallaanka/carruurta. *Carruurta Yaryar (Young Children)*, 5(1), 58–67.
- Lally, J. R., Torres, Y. L., & Phelps, P. C. (2010). Sida loo daryeelo dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah koox ahaan (How to care for infants and toddlers in groups). Saddex ilaa Ebar (Zero to Three). <https://www.zerotothree.org/resources/77-how-to-care-for-infants-and-toddlers-in-groups>
- Lally, J. R., & Mangione, P. L. (n.d.). *Xog ku saabsan Barnaamijka Xannaanada Dhallaanka/Ilmaha socod baradka ah*. WestEd; Waaxda Waxbarashada California. Waxaa bishii Maarso 10, 2020, laga soo xigtay <https://www.pitc.org/about>
- McMullen, M. B., Yun, N., Mihai, A., & Kim, H. (2016). Waaya-aragnimada waalidiinta iyo xirfadlayaasha barnaamijyada daryeelka joogtada ah ee sida wanaagsan loo aasaasay. *Waxbarashada iyo Hormarka*, 27, 190–220.
- Morrissey, T. W. (2009). Qorsheyaasha badan ee daryeelka-carruurta iyo natiijooyinka dabecada carruurta yaryar. *Kobaca Carruurta*, 80(1), 59–76.
- Gollaha Sayniska Qaranka ee Ilmaha Koraaya (National Scientific Council on the Developing Child.). (2007). *Sayniska horumarinta dhallaanka (The science of early childhood development) In la xidho farqiga u dhexeeya waxa aan naqaan iyo waxa aan sameyno*. www.developingchild.harvard.edu
- Raikes, H., & Edwards, C. (2009). *Kordhinta qoob ka ciyaarka daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (Extending the dance in infant and toddler caregiving)*. Paul H. Brookes Publishing Company, Inc.
- Ruprecht, K., Elicker, J., & Choi, J. (2016). Sii wadida daryeelka, is dhexgalka daryeel bixiyaha - ilmaha, aqoonta bulsheed ee socod baradka iyo dabecadaha dhibaataada. *Waxbarashada iyo Hormarka*, 27, 221–239.
- Theilheimer, R. (2006). Qaabeynta carruurta (Molding to the children): Daryeelka aasaasiga ah iyo sii wadista daryeelka. *Zero to Three*, 26(3), 50–54.
- Virmani, E. A., & Mangione, P. L. (Eds.). (2013). *Daryeelida dhallaanka/socod-baradka (Infant/toddler caregiving): Tusmo ku aadan daryeel ku haboon dhaqanka* (daabacaada 2aad.). Waaxda Waxbarashada California.

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401

limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub

http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR

CHILDREN & FAMILIES



Jimicsi Joogto ah: Ka qaybgalka Xiriirka Xushmad iyo Wax ka qabasho leh

Ka fikir hal ilmo oo aad maanta daryeeshay iyo is-dhexgalka aad la yeelatay iyada ama isaga. Sidee ixtiraam ugu muujisay iyada ama isaga? Qaabkee ayaad uga jawaabtay?

Qeex sida aad ahayd:

- ◆ Diiran oo leh daryeel;
- ◆ u nugul baahiyaha ilmaha shakhsi ahaan;
- ◆ la heli karo marka ilmuhu kuu baahdo;
- ◆ Taageerada iyo dhiirigelinta; iyo
- ◆ oo ka jawaabaya dadaalka cunuga si uu kula xiriiri.

Marka aad daryeeleyso koox caruur ah, waxaa jiri kara waqtiyo aadan u jawaabin sida aad jeclaan lahayd inaad ula jeedo ilmo gaar ah. Qaadashada waqti aad ku fikirto oo aad aqoonsato fursadahaan la seegay waxay horseedi kartaa milicsi qoto dheer. Marka aad ka fikirto isla ilmo isku mid ah, weydii naftaada waxyaabaha soo socda:

- ◆ Ma jiraan fursado la lumiyay si looga jawaabo? Ma ogtahay? Maxaa ku hor istaagay?
- ◆ Maxaad sameyn lahayd si ka duwan marka xigta?
- ◆ Ma jirtaa wax taageero ah oo aad uga baahan tahay asxaabtaada ama barnaamijka?

Ka fikir markii ugu dambaysay ee aad la macaamisho xubin qoyska ka tirsan ilmahaas. Sidee ixtiraam ugu muujisay iyada ama isaga? Qaabkee ayaad uga jawaabtay?

Marka aad la jaanqaadeyso koox caruur ah, xubnaha qoyskooda, iyo asxaabtaada, waxa kale oo jiri kara waqtiyo aadan u jawaabin ama ixtiraamin xubnaha qoyska sidaad jeclaan lahayd inaad sameyso Mar labaad, ogoow fursadahaan la seegay inay kaa caawin karaan inaad dib u milicsato oo aad tixgeliso haddii ay jiraan isbadello aad jeclaan lahayd inaad ku samayso habkaaga xubnaha qoyska. Marka aad ka fikirto isla xubin katirsan qoyska, weydii naftaada waxyaabaha soo socda:

- ◆ Ma jiraan fursado la lumiyay oo keeni lahaa is-dhexgal ixtiraam iyo xushmad leh? Ma ogtahay? Maxaa ku hor istaagay?
- ◆ Maxaad sameyn lahayd si ka duwan marka xigta?
- ◆ Ma jirtaa wax taageero ah oo aad uga baahan tahay asxaabtaada ama barnaamijka?



U deji laba hadaf oo naftaada si aad xiriir jawaab celin leh ula yeelato ilmahaan iyo xubnaha qoyskiisa:

1.

2.

Labada todobaad ee soo socda, qaado wakhti aad kaga fikirto horumarka aad ka gaartay yoolalkan.

- ◆ Ma jiraan waqtiyo aad la yeelatay isdhexgal jawaab celin ah badan ah ilmaha ama xubnaha qoyska?
- ◆ Miyaad dareentay isbadello ku yimaaday dabeecada ilmaha ama xubnaha qoyska markii aad ka jawaabtay?
- ◆ Xaggee baad uga baahan tahay taageero dheeraad ah? Yaa ama maxaa bixin kara taageeradaas?

Haddii ay suurtagal tahay, tan la samee lamaane oo ka wada hadla ujeedooyinkiina iyo horumarkaaga midba midka kale.

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

**State Capacity Building Center,
A Service of the Office of Child Care**

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES

U qoondeeynta macaliimka Daryeelka Aasaasiga ah

Arrimo kala duwan waa in la tixgeliyo marka la qoraayo macallimiinta daryeelka ilmaha aasaasiga ah carruurta, oo ay ku jiraan u-qalmitaanka qoyska; mudnaanta diiwaangelinta; xeerarka iyo shuruudaha ruqsada ee kooxaynta da'da, saamiga, iyo tirada kooxda; iyo boosaska banaan. Si kastaba ha ahaatee, go'aanada ku saabsan meelaynta daryeelka aasaasiga ah waa in la sameeyaa, ilaa heerka ugu sarreeya ee suurtagalka ah, iyadoo la raacaayo baahida gaarka ah ee ilmo kasta iyo awoodaha iyo sidoo kale baahiyaha kooxaha. Mudnaanahaan waxaa kamid ah:

- is waafajinta jadwalka shaqaalaha iyo ilmaha;
- ilaalinta saamiga hoose iyo xajmiga kooxda;
- taageerida wanaagga dabeecadda ku habboon macallinka daryeelka ilmaha iyo dhallaanka;
- abuurista dheellitirka raaxada leh ee noocyada dabeecadda ee kooxda;
- ku habboon luuqadda guriga iyo dhaqanka ilmaha;
- ka jawaabista dookhyada qoyska;
- taageerada sii wadista qoyska marka macalinka daryeelka dhallaanku uu daryeeshay walaal;
- bixinta da'da raaxada leh ee kooxda;
- siinta saaxiibtinimada carruurta da'doodu kala duwan tahay;
- dookhyada ilmaha ee macalinka daryeelka dhallaanka;
- dookhyada macalinka ee daryeelka dhallaanka;
- Awooda macalinka ee daryeelka dhallaanka si uu u daboolo baahiyaha ilmaha naafada ah ama baahiyaha kale ee gaarka ah; iyo
- meelaynta ku haboon marka la eego da'da iyo heerka ubadka.

1. Marka macalinka daryeelka dhallaanka aasaasiga ah uu maqan yahay ama uu ka tago barnaamijka:

- Dib ugu meeleynta carruurta macalinka daryeelka dhallaanka sare ee isla qolka, haddii ay suurtagal tahay.
- Shaqaaleysii "macallin ilaha" ama shaqaale dheeraad ah si aad u beddesho macallimiinta daryeelka dhallaanka aasaasiga ah.
- Sii badel ka baxsan barnaamijka oo khibrad hore u lahaa qolka oo yaqaan carruurta.
- Isticmaal badelka la yaqaan, haddii loo baahdo, carruurta waaweyn iyo doorarka taageerada macallimiinta daryeelka ilmaha la yaqaan.

- Macallinka cusub ee daryeelka dhallaanka aasaasiga ah ha bilaabo shaqada kahor inta uusan macallinka xannaanada aasaasiga ah ee koowaad ee hadda jira ka tagin si loo fududeeyo kala-guurka.
- Macalinka (macalimiinta) sare ee daryeelka dhallaanka qolka haku siiyaan xiriirka macalinka cusub ee xanaanada dhallaanka.

2. Barnaamijyada leh kormeerayaal, layliyo, shaqaale arday, iyo tabaruceyaal:

- Shaqaaleysii xubnaha shaqaalaha caadiga ah si carruurta loogu meeleeeyo macalimiinta daryeelka dhallaanka aasaasiga ah ee koowaad kuwaas oo si joogto ah loo heli karo.
- Sii booqdayaasha iyo ardayda fursado indho-indhayn oo aan qarsoonayn, haddii ay suurtoagal tahay.
- Xadid tirada dadka waaweyn (marka laga reebo xubnaha qoyska) ee qolka hal mar.
- Deji siyaasado bixiya sii wadista daryeelka ugu weyn ee suurtoogalka ah ee carruurta ugu yar.

© WestEd. Waxaa soo saaray Peter Mangione iyo Alicia Tuesta waxaana loogu talagalay Barnaamijka Daryeelka Dhallaanka/Socod-baradka (PITC). PITC waa mashruuc ay wada fuliyaan Waaxda Waxbarashada ee California iyo WestEd, kaas oo socday tan iyo 1985.